# Hoggaanka socdaalka waxaa uu codsiyada maganagalyoddoonka u falanqayn karaa qaabka ah nidaamka xudduudka, laga bilaabo 1.9.2024

Hawlwadeenka baarista xuduudka ayaa mustaqablka ku hagi doona qofka magangalyoddoonka ah ee ka soo galay xadka ka baxsan Finland, qaabka cusub ee ah nidaamka xudduudka. Hoggaanka socdaalka waxaa uu codsiga magangalyoddoonka u falanqayn karaa nidaamka xudduudka, haddii waxyaabaha codsiga lagu saleeyay ay tilmaamayaan arrinka ah, in hoggaanka socdaalku oo joojin karo codsiga iyadoo aan la baarin, ama uu u falanqayn karo codsiga qaabka ama habka la dedejinaayo.

Isbeddelka sharciga waxaa uu dhaqangalayaa laga bilaabo 1.9.2024.

## Joojinta baarista iyo qaabka dedejinta

Joojinta baaritaanka waxaa loola jeedaa, in hoggaanka socdaalka uusan baaritaan ku samaynayn waxyaabaha aad ku salaysay codsigaaga magangalyoddoonka. Hoggaanka socdaalku waxaa uu gaari karaa go'aanka ah in uusan baarin codsiga, haddii uu baaritaanka bilowga ah ee codsiga kaddib ogaado, in sii wadista baaristu ay tahay mid aan lahayn wax sabab ah oo lagu saleeyo.

- Xaaladdaas oo kale waxaa ay noqon kartaa tusaale ahaan, haddii aad samaysay codsi cusub, kaasoo aanay ku jirin wax sababo cusub ah, kuwaasoo keeni kara in Hoggaanka socdaalku uu baari lahaa codsiga.

Nidaamka dedejinta waxaa loola jeedaa, in Hoggaanka socdaalku uu codsigaaga u falanqeeyo si ka dhakhso badan sidii caadiga ahayd. Haddii Hoggaanka socdaalka uu diido nidaamka dedejinta codsigaaga, waxaa uu codsigaaga u arki karaa inuu yahay mid aan wax sal ah lahayn.

- Hoogaanka socdaalku waxaa uu codsigaaga u falanqayn karaa si ka dhakhso badan sidii caadiga ahayd, tusaale ahaan haddii aadan codsigaaga ku soo bandhigin sababo ku salaysan dhanka sharciga oo ku saabsan siinta ama oggolaanshaha badbaadada caalamiga ah, ama waxyaabaha aad codsigaaga ku salaystay ay si cad oo muuqata u yihiin kuwo aan la rumaysan karin, ama hawlwadeennada dowladda marinhabaabisay.

# Nidaamka xudduudka oo la soo koobay

1. Marka aad magangalyada ka codsatay dalkaan Finland, sarkaalka ama hawlwadeenka ka socda baarista xudduudka, waxaa uu diiwaangelinayaa codsigaaga, sidoo kale waxaa uu keydinayaa farahaaga, saxiixaaga iyo sawirkaaga.
2. Hawlwadeenka baarista xudduudka ayaa adiga kugu hagaaya dhanka nidaamka xudduudka iyo xerada qaxootiga. Waxaad hawlwadeenka baarista xudduudka ka heleysaa macluumaadka ku saabsan nidaamka xudduudka iyo falanqaynta codsigaaga magangalyoddoonista. Inta uu kuu socdo nidaamka xudduudka, waxaa adiga kugu waajib ah inaad joogto aagga lagu amray ama laguu qoonddeeyay ee xerada qaxootiga, adigoo aan wax oggolaansho ah haysanna,

kama bixi kartid aaggaas xerada qaxootiga. Xerada qaxootiga ayaa kuu sheegeysa aagga aadan ka bixi karin.

- Waxaa dhici karta in hawlwadeenka baarista xudduudka uu ku geeyo haynta kummeelgaarka ah (säiliö), uuna kugu hago dhanka waaxda haynta kummeelgaarka ah. Waxaa markaa sida ugu dhakhsaha badan aad ku heleysaa macluumaadka ku saabsan waxyaabaha lagu saleeyay gaynta haynta kummeelgaarka ah, iyo macluumaadka kale ee ku saabsan geynta haynta kummeelgaarka ah. Waaxda haynta kummeelgaarka ah waa meel xiran, lagamana bixi karo aagga goobtaas.

3. Haddii Hoggaanka socdaalka uu codsigaaga ku falanqeeyo nidaamka xudduudka, Hoggaanka socdaalka waxaa uu si degdeg ah kuugu yeerayaa waraysiga magangalyoddoonista. Sida badan waxaa Hogaanka socdaalku uu waraysigaas kaaga qaadayaa dhanka xiriirka fiidiyowga, oo waxaad waraysiga ka qaybqaadanaysaa adigoo jooga xerada qaxootiga ama waaxda haynta kummeelgaarka ah.
    - Haddii Hoggaanka socdaalka uu arko in codsigaaga uusan ka mid ahayn codsiyada nidaamka xudduudka, xerada qaxootiga ama waaxda haynta kummeelgaarka ah ayaa adiga ku siinaaya ogeysiiska ku saabsan dhammaadka nidaamka xudduudka. Xaaladda sidaas ah, codsigaaga magangalyoddoonista waxaa loo falanqayn doonaa sidii caadiga ahayd.
4. Waraysiga kaddib Hoggaanka socdaalka waxaa uu gaari doonaa go'aanka codsigaaga muddo 4 toddobaad gudahood ah, oo laga soo bilaabaayo markii aad codsatay magangalyada.
5. Booliska ayaa adiga ku siinaaya wargelinta ku saabsan go'aanka. Waxaad xaq u leedahay in aad racfaan ka qaadato go'aanka. Go'aanka waxaa la socda hagis qoraal ah oo ku saabsan sida loo sameeyo racfaanka. Racfaan qaadashada wax saamayn ah kuma lahan nidaamka xudduudka. Nidaamka xudduudku waxaa uu adiga dhankaaga ka sii socon doonaa, tan iyo inta aad ka heleyso ogeysiiska ku saabsan dhammaadkiisa.
6. Xerada qaxootiga ama waaxda haynta kummeelgaarka ah ayaa kuu sheegaaya adiga, marka nidaamka xudduudku uu dhammaado. Waxaad heli doontaa macluumaad qoraal ah oo arrinkaas ku saabsan.

## Caawimaadda arrimaha sharciga ee nidaamka xudduudka

Waxaad xaq u leedahay in aad hesho caawimaadda arrimaha sharciga, taasoo loola jeedo in aad la kulanto caawiye arrimaha sharciga ah, muddada falanqaynta codsigaaga magangalyoddoonka oo dhan. Waa inaad adigu iskaa u raadsato caawiyaha. Xafiisyada guud ee caawimaadda arrimaha sharciga ayaa awooda in ay kuu diyaariyaan caawiye, xitaa xaaladaha degdegga ah, sidaas awgeed waxaa adiga kuu suuraggal ah in aad si dhakhso ah u hesho caawiye.

Haddii aadan raadsan caawiye kula jooga waraysiga magangalyoddoonka, si kastaba Hoggaaka socdaalku wuu qaban karaa waraysiga caawiye la'aan.  Caawiyuhu wuxuu waraysiga kaga qaybqaadanayaa hadba sida uu isagu go'aansado. Caawimaadda ku saabsan raadsashada caawiyaha, waxaad weydiisan kartaa xeradaada qaxootiga.

## Sidee ayuu nidaamka xudduudka uga duwan yahay qaabab kale ee falanqaynta codsiga magangalyada?

Hoggaanka socdaalku waxaa uu markasta codsigaaga u baarayaa si shakhsi ahaaneed, oo buuxda islamarkaana caddaalad ah. Codsigaaga waxaa loo baari doonaa si la mid ah sida codsiyada aan lagu falanqaynaynin nidaamka xudduudka. Sidoo kale waxaad ka heli doontaa hawlwadeennada dowladda ee xeradaada qaxootiga talooyin la mid ah kuwa la siiyo magangalyodoonayaasha kale. Xilliga lagu guda jiro baaritaanka codsigaaga magangalyoddoonka, waxaad heli doontaa macluumaadka ku saabsan falanqaynta codsigaaga magangalyada iyo heerarka kala duwan ee uu maraayo, sidoo kale xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga.

Nidaamka xudduudka waxaa uu kaga duwan yahay falanqaynta kale ee codsiga magangalyoddoonka, waxyaabaha soo socda:

- Sida sharcigu dhigaayo Hoggaanka socdaalka waa in go'aanka codsigaaga ee nidaamka xudduudka uu ku gaaraa muddo 4 toddobaad gudahood ah, laga soo bilaabo markii aad codsatay magangalyada. Nidaamka xudduudka waxaa uu sii soconayaa tan iyo inta aad xeradaada qaxootiga ka heleyso ogeysiiska ku saabsan dhammaadka nidaamka xudduudka.
- Haddii codsigaaga lagu falanqaynaayo nidaamka xudduudka, xilligaas nidaamka xudduudka lagu guda jiro, kama bixi kartid aagga lagu amray inaadan ka bixin ee xerada qaxootiga, adigoo aan haysa oggolaansho gaar ah.

## Faahfaahinta dheeraadka ah

- Nidaamka xudduudka: Border procedure
- Joojinta baaritaanka: When is an application not processed in Finland?
- Falanqaynta la dedejiyay: Nopeutettu käsittely | Maahanmuuttovirasto (migri.fi).